


Warbixinta Qiimaynta Khatarta Dalawandigu ku leeyahay Bii'ada



Waxaa Lagu sameeyay:

Guri Gaar loo leeyahay
{«Street»}
{«City, State Zip»}
{«County»}

Qiyaasta Taariikhda La Dhisay: {«Enter Date of Construction»}

Xogta Mulkiilaha Guriga:

{«PropertyOwnerName»}
{«MailAddress»}
{«MailCity», «MailState» «MailZip»}

Waxaa Diyaariyay:

{«HDName»}
{«HDRepresentativeName»}
{«HDStreetAddress»}
{«City, State Zip»}
Taleefanka: {«HDPhone»}
Fakiska: {«HDFax»}

Saxeexa: _____

Taariikhda Baadhitaanka: {«Enter DateofAssessment»}

Taariikhda Warbixinta: {«Enter DateofReport»}

Liiska Mawduucyada

1. Xogta Aasaasiga ah
2. Khulaasada Xogta
3. Aqoonsiga xogta iyo Ujeedada Baaritaanka Riinjiga ka Samaysan Dalawandiga iyo Qiimeynta Khatarta Sunta Dalawandiga ah
4. Khataraha Riinjiga Dalawandiga ee la Aqoonsaday
5. Shuruudaha iyo Xadidaadaha
6. Xogta Goobta iyo Baaritaanka Goobta
 - a. Sanbalka Riinjiga iyo Baaritaanka
 - b. Natiijooyinka Baaritaanka Riinjiga Dalawandiga ka samaysan ee XRF
 - c. Sanbalka Busta Gudaha iyo Xogta Shaybaadhka
7. Lifaacyada
 - a. Lifaacaq A Xogta Qiimeynta Sanbalka ee XRF
 - b. Lifaacaq B Xogta Qiimeynta Sanbalka Busta
 - c. Lifaacaq C Oorshaha Dhismaha Goobta iyo Sagxada Guriga
 - d. Lifaacaq D Xog Uruurinta Xaaladaha Dhismaha – Foom 5.1
 - e. Lifaacaq E Ruqsada iyo Shahaadada Qiimeeyaha Khatarta
 - f. Lifaacaq F Xaashida Sifooyinka Shaqada XRF
 - g. Lifaacaq G “Hadalka Sunta Dalawandiga:” Eray Bixinno Kooban
 - h. Lifaacaq H Xogta Dheeriga ah ee Khayraadka Dalawandiga iyo Badqabka Sunta Dalawandiga
 - i. Lifaacaq I Khayraad ku aadan Xogta Dheeriga ah ee ku aadan Riinjiga Dalawandiga iyo Khataraha Riinjiga ka Samaysan Dalawandiga

Xogta Aasaasiga ah

Ma jiraan wax khataraha sunta dalawandiga ah oo laga helay gurigaan. Dusha meelaha riinjiga la marshay ee la baaray ayaa la xaqiijiyay inaysan lahayn riinjiga dalawandiga ka samaysan ama ay ka samaysan yihiin maadooyin aan kahtar ahayn (aan soo fuqayn). Natiijooyinka busta la baaray ayaan muujin dalawandi ku jira busta.

{«Add description of property»}

Khulaasada Xogta

Sida ku cad qaybaha 3742.35 iyo 3742.36 ee Xeerka Cusub ee Ohio, markay ahayd {«Enter DateofAssessment»}, baaritaanka sunta dalawandiga bii'ada ayaa lagu sameeyay guriga {«Street, City, State Zip»}. Baaritaanka ayaa ka koobnaa qaybaha soo socda:

- ✓ Ka jawaabida foomka su'aalaha si loo go'ansho ilaha ay sunta dalawandigu ku jiri karto;
- ✓ Kormeerka il marinta ah ee xaalada riinjiga;
- ✓ Adeegsiga qalabka baaraha raajada la qaadi (XRF) si looga baaro dalawandiga riinjiga; iyo
- ✓ Qaadista sanballada baaritaanka dalawandiga bii'ada.

Hoos waxa aku qoran warbixinta xogta lasoo uruuriyay intii baaritaanu socday.

Xogta aqoonsiga iyo Ujeedada Baaritaanka

Baaritaanka sunta dalawandiga bii'ada (Qiimeynta) ayaa lagu sameeyay {«PropertyAddress»} markay ahayd {«Enter DateofAssessment»}. Baaritaanka waxaa sameeyay {«InvestigatorName»}, Baaraha Sunta Dalawandiga oo Ruqsad haysta iyo Qiimeeyaha Khatarta (Lambarka Ruqsada Ohio {«#LAXXX»}). Ujeedada Baaritaanku wuxuu ahaa in la baaro khataraha sunta dalawandiga ee ku jiri kara dusha meelaha gudaha iyo banaanka guriga iyo agabka ku dhagan ama aan ku dhaganayn ee yaala isla aag guriga la dagan yahay.

Khataraha Dalawandiga ee la Aqoonsaday

Dhismaha iyo riinjigiisa ayaa ahaa {«Describe Paint Condition»} intii la waday Baaritaanka, natiijooyinka XRF ee riinjiga la baaray ayaa muujinaaya in khataraha Riinjiga Ka Samaysan Dalawandiga (LBP) uusan meesha ka jirin, sida lagu qeexay Sharciga Yareynta Khatarta LBP ee Guryaha la Dagan yahay 1992 (Title X) iyo sida lagu qeexay xeerka Environmental Protection Agency (EPA) oo lagu daabacay Janaayo 5, 2001 Diiwaanka Federaalka.

Liiska goobaha sanballada baaritaanka bii'ada iyo heerarkooda sunta dalawandiga ayaa laga heli karaa qaybaha ka hadlaaya natiijooyinka baaritaannada shaybaarka ee riinjiga, busta, ciida, jабabka riinjiga iyo biyaha.

Shuruudaha iyo Xadidaadaha

Shaqaalaha {«HDName»} ayaa sameeyay shaqooyinka kor ku qoran una sameeyay qaab adag oo xirfad leh oo waafaqsan farsamooyinka caadiyan lagu adeegsado shaqada, ayagoo adeegsanaaya nidaamyada casriga ah iyo tignooloojiyada ugu casrisan ee la heli karo, wakhtiga la samaynaayay qiimeynta. Waaxda {«HDName»} ma damaanad qaadi karto mana lahan masuuliyada in Qiimeyntaan ay aqoonsatay dhammaan ciladaha xunxun ee dhanka bii'ada iyo/ama xaaladaha saamaynaaya guriga taariikhda la sameeyay Qiimeynta. Waaxda {«HDName»} ma damaanad qaadi karto mana damaanad qaadayso in Qiimeyntu buuxisay shuruudaha, ama ay bixinayso difaac sharci oo la xiriirta, sharciyada ama xeerarka bii'ada. Waa masuuliyad saaran mulkiilaha

Waxaa dib loo cusboonaysiyaay 6/24

guriga lagu samaynaayo qiimeynta inuu ogaado uuna ku dhaqmo dhammaan sharciyada, xeerarka, iyo shuruudaha quseeya, sharciga dayactirka iyo riinjiyaynta.

Natiijooyinka lasoo gudbiyay iyo go'aanka kama danbays ah ee ay gaareen {«HDName»} waxaa keliya lagu saleeyay maslaxada mulkiilaha guriga. Natiijooyinka iyo fikradaha ku qoran warbixintaan, oo lagu saleeyay keliya xaaladaha lagu arkay guriga taariikhda la sameeyay Qiimeynta, ayaa sax noqonaaya keliya taariikhda la sameeyay Qiimeynta. Waaxda {«HDName»} ayaan qaadanayn wax masuuliyad ah si ay ugula taliso mulkiilaha samaynta wax isbadello ah oo lagu sameeyo khataraha dhabta ah ama imaan kara ee sunta dalawandiga ee gurigaan ama dhismeyaasha ku dhaqan ama aan ku dhaganayn oo ku yaala isla seedka guriga kuwaasoo hadhoow la baari karo ama aan la baari doonin. Shuruudo iyo xadidaado dheeri ah oo ku aadan warbixintaan heshiiska ah ayaa lagu qoray shuruudaha iyo xeerarka guud ee la siiyay mulkiilaha si loola galo heshiiska adegeyada.

Xogta Goobta iyo Baaritaanka Goobta

Sanbalka Riinjiga iyo Baaritaanka

Baaritaanka riinjiga ku saleysan dalawandiga ayaa lagu sameeyay gurigaan. Ma jirin sanballada jajabka riinjiga oo la qaaday. Markii ay ahayd {«DateofAssessment»}, wadarta guud oo dhan {«NumberofReadings»} baaritaan (qiimeyn) ayaa lagu sameeyay dusha meelaha gudaha guriga ayadoo la adeegsanaayo XRF. Heerarka sunta dalawandiga ee buuxiya ama ka bata heerarka la daabacay ee HUD oo loo aqoonsaday kuwo khatar ah (tusaale, ka wayn ama u dhigma 1.0 mili-garaam calaa senti mitir iskuweer $\geq 1.0 \text{ mg/cm}^2$) ayaan la arkin.

Xogta Qalabka

Waxshada Samaysa XRF:

Lambar Sireedka:

Taariikhda Isha Sunta Shoocaaca:

Nooca:

Qaabka Shaqada:

Baaritaannada Cabirka XRF

Akhriska	Qaabka Shaqada	Heerka la Adeegsaday	Natiijada

Natijoooyinka Baaritaanka Riinjiga Dalawandiga ka samaysan ee XRF

Natijoooyinka XRF ayaa laga heli karaa Lifaafa A.

Sanbalka Busta Gudaha

Wadarta guud oo dhan {«Choose or Type Number»} sanballada busta ah ayaa la qaaday dedaal lagu doonaayo in lagu go'aansho heerarka busta dalawandigu ku jiro ee ku jirta gudaha daaqaadaha iyo albaabada. Sanballadaan ayaa laga soo uruurshay aagaga ay ugu badan tahay in dalawandigu ku jiro haddii dalawandiga ku jira bustu uu jiro. Sanballadaan ayaa lasoo uruurshay si waafaqsan shuruudaha Heerka ASTM E-1728, Farsamada Guud ee Uruurinta Goobta ee Sanballada Busta meesha ku dhagtay Ayadoo la Adeegsanaayo Qaababka Sanbal Qaadista Istiraasho Marinta oo loo adeegsado Farsamooyinka Atomic Spectrometry. Sanbal maran «[enter sample name and description]» ayaa lagu qaaday laguna baaray xadiyada heerka ugu yar ee la heli karo ee sunta dalawandiga *cabirka dalawandiga $<10 \mu\text{g}/\text{ft}^2$). Sharciyada EPA, HUD iyo Gobalka Ohio ayaa ku qeexaaya heerarka soo socda kuwo khatar badan busta sunta dalawandiga ee ku jirta guryaha: Sagxadaha guriga – $\geq 10 \mu\text{g}/\text{ft}^2$ (mikroo garaamis calaa iskuweer Fuud); duleellada gudaha ee daaqaadaha – $\geq 100 \mu\text{g}/\text{ft}^2$. Ma jiro heerka khatarta busta dalawandiga ee EPA u dejisay banaanka daaqaada. Fadlan ka eeg *Lifaafa B – Xogta Qiimeynta Busta Lasoo Qaaday* ee warbixinnada shaybaarka iyo *lifaafa H – Dalawandiga Dheeriga ah iyo Xogta Khayraadka Badqabka Dalawandiga* si aad u hesho liiska daabacaadaha iyo khyaraadka ka hadlaaya khataraha dalawandiga iyo ciladahooda caafimaadka; labaduba waxay ku jiraan dhammaadka warbixintaan. Sida hoos lagu sheegay, heerka khatarta badan ee busta dalawandiga leh, sida ay ku qeexday EPA iyo HUD, ayaan laga helin midna sanballada.

Natijoooyinka Sanballada Busta Gudaha

Sanbalka	Goobta	Aaga Sanbalka (ft ²)	Natijoooyinka ($\mu\text{g}/\text{ft}^2$)	Dookhyada Xakamaynta

Xogta shaybaadhka

Shaybaadhka:

Ciwaanka:

Baratakoolka Baaritaanka Busta Lasoo Qaaday:

Heerka Dhexe ee Busta Lasoo qaaday:

Lambar Sireedka Barnaamijka Qaran ee
Sharciyaynta Shaybaadhka Sunta Dalawandiga:

Lifaaqyada

Lifaaqa A Xogta Qiimeynta Sanbalka ee XRF

Xogta buuxda ee XRF ayaa ku jirta bogaga soo socda.

Lifaaqa B

Xogta Qiimaynta Sanbalka Busta

Lifaaqa C

Qorshaha Dhismaha Goobta iyo Sagxada Guriga

Xogta Qiimeynta Indho-indhaynta ah
loogu talo galay Qiimeynta Khatarta Sunta Dalawandiga ee Caafimaadka Dadwaynaha

Taarikhda
Baadhitaanka: _____

Ciwaanka Guriga: _____

Magaca Baaraha
Khatarta Dalawandiga: _____

Magaca Mulkiilaha Guriga: _____

A. Xaalada Guud ee Dhismaha—Kormeerada Guud

Xaalada	Haa	Maya	Qodobada muhiimka ah
Saqaf ka maqan qaybo kamid ah dusha guriga (mutuleelka, qaanadaha, burburka, iwm.)			
Saqafka waxaa ku yaala duleello iyo dilaacyo waawayn			
Minjaroorada ama tuubooyinka biyaha saqafka oo jaban			
Tuubada foornada oo dilaacsan, dhagaxaan dabcaay ama ka maqan, sida muuqata ka maqan bamka			
Darbida banaanka ama gudaha ayaa leh dilaacyada duleellada waawayn, una baahan wax ka badan calamadinta dheeriga ah (haddii loo baahdo) ama riinjiyayn			
Geesaha banaanka ayay ka maqan yihiin alwaaxyo, qaybo ama duleelo yar leh			
Biyaha ayaa ku dhashuumaaya darbida gudaha ama safiitada			
Salaaxa darbida, sagxadaha ama safiitada ayaa xumaaday			
Labo daaqadood ama ka badan ama albaab ayaa burbursan, maqan ama aan la furi karin			
Salaanka ama jaranjada ilinka ayay qaybo badan ka jaban yihiin, ka maqan yihiin ama halaabeen			
Aasaska ayaa leh dilaacyo badan, qaybo ka maqan, daciifida diirarka, ama u muuqda mid aan fiicnayn			

B. Qiimeynta Indho-indhaynta ah ee Aagaga Ciida Qaawan

Goobta	Tigsaar dhammaan meelaha quseeya			Qodobada muhiimka ah
	Aaga Ciyaarta	Aaga Ka baxsan aaga Ciyaarta	Sanballada lasoo Uruurshay	

Lifaaqa F

Xaashida Sifooyinka Shaqada XRF

Xakamaynta Sunta: Waa talaabo ama tiro talaabooyin ah oo loo sameeyay in si rasmi ah loo baabi'iyo khataraha riinjiga ka samaynta dalawandiga ama riinjiga ka samaysan dalawandiga. Xeeladaha xakamaynta sunta waxaa ku jira in meesha laga saaro riinjiga ku saleysan dalawandiga, xirista, awdista, badelida qaybaha dhismaha ee lagu sameeyay riinjiga dalawandiga, ka saarida meesha busta sunta dalawandiga leh, iyo meesha ka saarida ciida ku sumoowday dalawandiga ama ku daboolista dhammaan ciida dabool muddo dheer jiraaya sida laami (caws iyo nagaar ayaa loo arkaa talaabooyinka xakamaynta ku meel gaarka ah). Dhammaan xeeladahaan ayaa u baahan diyaarin; nadiifin; fogaynta qashinka; baaritaanka xaqiijinta sifaynta; haynta diiwaanka; iyo, haddii ay jirto, kormeerid. (Si aad u hesho qeexitaanka buuxa ee EPA, ka eeg 40 CFR 745.223).

Ciida Qaawan: Ciida aysan ku daboolnayn caws, nagaar, dhirta kale ee kuwaas lamidka ah, ama jaay, ayna ku jirto ciida ku jirta sanduuqa ciida.

Waxyaabaha dusha e ilmuhu ruugi karo: Dusha meelaha gudaha ama banaan ee lagu riinjiyeeyay riinjiga dalawandiga oo ilmaha yaryar afka gashan karaan ama ruugi karaan. Dusha la ruugi karo ayaa lamid ah "dusha meelaha ilmuhu gaaro" sida lagu qeexay 42 U.S.C. 4851b(2). Agabka biraha adag iyo agabka kale ee aan lagu jabin karin qaniinyada ilmaha yaryar ayaan loo arkin sun la ruugi karo.

Riinjiga kasii daraaya: Riinji kasta oo daboolaaya dusha ama qayb burburtay, ama riinjiga meel kasta oo gudaha ama banaanka guriga ah oo dalawandi ka samaysan kaasoo soo fuqay, jajaby, jilcay, qolfoobay, jeexmay, bus noqday, qoyay, jeexmay, ama haddii kale kasoo fuqay meesha la mariyay.

Laynka Bud-dhiga/Aaga Aasaaska: Aaga ku yaala 3 fiid meel u jirta darbiga dhismaha kuna wareegsan aasaaska dhismaha.

Khatarta busta dalawandiga: Busta darbida guryaha la dagan yahay oo ay ku jiraan aag ama bas dhan ama ka badan heerka sunta dalawandiga ee ay dejisay EPA sida ku cad Title IV ee Sharciga Xakamaynta Maadooyinka Sunta ah. Heerarka EPA ee khataraha busta ka samaynta dalawandiga, kuwaasoo lagu sameeyay sanballada la soo qaaday, ayaa lagu daabacay 40 CFR 745.65(b); marka la joogo wakhtiga la dabaacay nuqulkaan ee *tilmaamaha*, kuwaan ayaa ah 10 µg/ft² sagxada guriga iyo 100 µg/ft² duleellada daaqadaha gudaha. Waxaa sidoo kale la yiraahdaa busta ay ka buuxdo sunta dalawandiga.

Dusha meelaha jilfaxda ah: Dusha darbida gudaha ama banaanka, sida daaqadaha ama jaranjarta, ee daxalaysan kara ama jilfax noqon kara.

Aaga Beerta: Waa aag geedaha lagu beero si dadku cuntada ugu beertaan ama loogu sharxo aagaga.

Aaga saamaynta: Waa goobta gudaha ama banaanka (sida dusha albaabada) oo waxyeeladu kasoo gaartay saamaynta ama isticmaalka joogtada ah.

Xakamaynta Ku meelgaarka ah: Waa tiro talaabooyin ah oo loo sameeyay in si ku meel gaar ah loo xakmeeyo u banbixida dadka ama suuragalnimada u banbixida khataraha riinjiga ka samaysan dalawandiga. Cabirada noocaas ah waxaa ku jira, laakiin kuma koobna, nadiifinta gaarka ah, dayactirada, joogtaynta, riinjiyaynta, xakamaynta ku meel gaarka ah, iyo abuurista iyo maaraynta shaqada iyo barnaamijyada waxbarashada dadka deegaanka. Kormeerka, oo ay sameeyaan dadka guriga leh, iyo dib u qiimeynada, oo ay sameeyaan xirfadyahanno, ayaa qaybo muhiim ah u ah xakamaynta ku meelgaarka ah. Xakamaynta ku meelgaarka ah waxaa ku jira bixinta busta; koolo marinta riinjiga; daawaynta meelaha jilfaxda noqday ama goobaha waxyeeloobay; rakibaada daboollada ciida, sida cawska ama nagaarka; iyo xakamaynta isticmaalka dhulka.

Xakamaynada gudaha ee fago gelinaaya dusha meelaha riinjiyaysan waa shaqooyin dayactir sida ku ah Xeerka Dayactirka, Sixida iyo Riinjiyaynta ee EPA.

Riinjiga ka Samaynta dalawandiga: Riinji kasta, dhalaalin, shellac, ama waxyaabaha kale ee guriga la marsho oo ka kooban dalawandi u dhigma ama ka badan 1.0 mg/cm^2 sida lagu cabiray baaritaanka XRF ama shaybaadka, ama 0.5 boqolkiiba miisaanka (5000 mg/g, 5000 ppm, ama 5000 mg/kg) sida lagu cabiray baaritaanka shaybaadhka. (Sharaxaada Maxaliga ah ayaa kaladuwanaa karta.)

Khatarta Riinjiga ka Samaynta dalawandiga: Xaalad ay u banbixida dalawandiga ku jira busta dalawandiga leh, ciida dalawandiga leh, ama riinjiga jajabay ee ka samaynta dalawandiga uu saamayn xun ku yeelan karo caafimaadka aadanaha (sida ay EPA ku cadeysay 40 CFR 745.65, oo ku jira qodobka Title IV ee Sharciga Xakamaynta Maadooyinka Sunta ah). Khatarta riinjiga ka samaysan dalawandiga waxaa kamid ah, tusaale, **khataraha dalawandiga riinjiga, khataraha busta dalawandiga, iyo khataraha dalawandiga ciida ku jira.**

Khatarta riinjiga ka samaynta dalawandiga: Riinjiga ka samaysan dalawandiga ee ku yaala meelaha jeexmay ee dalaxaysan kara iyo meesha ay ku jirto khatarta busta dalawandiga ee meelaha sagxada u dhow ah ee ka hooseeya meelaha dalaxaystay (tusaale, duleellada daaqada, ama sagxada), riinjiga burburay ama haddii kale fuqay ee ka samaysan dalawandiga ee ku yaala meesha waxyeeloowday taasoo ka dhalatay waxyeelo la xiriirta qayb kamid ah dhismaha; dusha qaybaha riinniga dalawandiga ee ilmu ruugi karaan oo ay ka muuqdaan calaamadaha qaniinyada ilkaha; ama riinji kasta oo ka samaysan dalawandi oo sii xumaaday kuna yaala guri kasta oo la dagan yahay ama xarun ilmo joogaan ama banaanka dhismaha la dagan yahay ama xarunta ilmuhu joogo.

Aaga ciyaarta: Aaga sida joogada ay ciida ugu ciyaaraan ilmaha kayar 6 sano sida lagu sheegay, laakiin kuma koobna, arimaha ay ku jiraan kuwa soo socda: ay yaalaan qalabka ciyaarta ee banaanka (tusaale, sanduuqyada ciida, agabka laalacshoowga iyo meelaha ilmuhu ku sibxadaan), boonbaleyaasha, ama agabka kale ee ilmaha, kormeerada agabka ciyaarta, ama xogta ay bixiyaan waalidka, dadka deegaanka, daryeel bixiyaasha, ama mulkiileyaasha guryaha.

Khatarta dalawandiga ku jirta ciida: Ciida qaawan ee guriga la dagan yahay oo ay ku jirto dalawandiga ka badan heerka ay dejisay EPA ee ku cad Title IV ee Sharciga Xakamaynta Maadooyinka Sunta ah. Heerarka EPA ee khataraha sunta ciida ku jirta, oo lagu daabacay 40 CFR 745.65(c), wakhtiga nuqulkaan daabacaada *Tilmaamahaan*, waa $400 \mu\text{g/g}$ aaga ciyaarta halka ay tahay $1,200 \mu\text{g/g}$ qaybaha kale ee fagaaga. Oo sidoo kale la yiraahdo ciida leh sunta dalawandiga.

Lifaaqa H Xogta Dheeriga ah ee Khayraadka Dalawandiga iyo Badqabka Sunta Dalawandiga

Qaybaha Muhiimka ah ee Cabirada

Gram (g ama gm): Cabirka cufta oo lagu saleeyay nidaamka mitirka. Kuul ayaa leh miisaanka 1 garaam, halka 1 fujaan oo biyo ah uu 1 sentimit yahay gees kasta. Garaam ayaa u dhigma ku dhawaad 35/1000 (boqoleeyda sodon shan kunaad ee hal wiiqiyad). Qaab kale oo loo cabiro tan waa in 28.4 garaam ay u dhiganto 1 wiiqiyad.

µg (microgram): Mikroogaraam waa 1/1000^{aad} ee hal miligaraam. Si looga bixiyo tusaale, shilin ayaa leh miisaanka 2 garaam. Si aad u hesho cabirka mikroogaram, waxaad u baahan tahay inad shilinka u qaybiso 2 milyan oo qaybood. Mikroogaraam waa mid kamid ah labadaas milyan oo qaybood.

µg/dL (mikroogarama calaa deciliter): waxaa loo adeegsadaa in lagu cabiro heerka dalawandiga ku jira dhiiga ilmaha iyo shaqaalaha si loo ogaado in caawimaad loo baahan yahay. Cabirka deciliter waa mid kayar nus koob.

µg/ft² (mikroogaraam calaa iskuweer fiid): cabirka loo adeegsado muujinta heerarka dalawandiga ku jira sanballada busta. Dhammaan warbixinnada waa inay ku soo sheegaan heerarka dalawandiga busta cabirka µg/ft².

mg/cm² (mikroogaraam calaa iskuweer sentimitir): waxaa loo adeegsadaa soo sheegista heerarka dakaandiga ku jira riinjiga ayadoo la adeegsanaayo baaritaanka XRF.

ppm (qaybood calaa milyan): Caadiyan waxaa loo adeegsadaa sheegista heerarka dalawandiga ku jira ciida. Waxaa sidoo kale loo adeegsan karaa sheegista cadadka dalawandiga ku jira riinjiga meesha ayadoo lagu saleynaayo cufta. Cabirkaan ayaa sidoo kale lagu muujin karaa: µg/g, mg/kg ama mg/l.

ppb (qaybood calaa bilyan): Caadiyan waxaa loo adeegsadaa in la sheego cadadka dalawandiga ku jira biyaha la cabo. Cabirkaan ayaa sidoo kale mararka qaar lagu sheegaa: µg/L (mikroo garaam calaa liitar).

Heerarka Riinjiga Dalawandiga Ka masamaysan iyo Khatarta riinjiga dalawandiga ee EPA/HUD

Riinjiga ku saleysan Dalawandiga (waxaa lagu go'aamin karaa midkood labo qaab)

- heerka meesha (cufta dalawandiga ku jira aag kasta) 1.0 µg/cm²
- Cufta guud (cufta dalawandiga heerka guud) 0.5%, 5000 µg/g, ama 5000 ppm

Heerarka U degsan Sunta Dalawandiga ee Busta

- Sagxadaha 10 µg/ft²
- Duleellada Daaqadaha Gudaha 100 µg/ft²
- Qaybaha Banaanka Daaqada (qiimeynta xaqiijinta ah keliya) 100 µg/ft²

Cabirada Sunta Dalawandiga Ciida

- Aaga ciyaarta ee ay adeegsadaan ilmaha kayar 6 400 µg/g, ama 400 ppm
- Aagaga kale 1200 µg/g, ama 1200 ppm

Lifaaqa IKhayraad ku aadan xogta dheeriga ah ee ku aadan Riinjiga Dalawandiga iyo Khataraha Riinjiga ka Samaysan Dalawandiga

Xarunta Xogta Dalawandiga iyo Xaqiijinta ee Qaran:

{1-800-424-LEAD (1-800-424-5323)}

{<https://www.epa.gov/lead/forms/lead-hotline-national-lead-information-center>}

Barnaamijka Kahortaga Dalawandiga ee Centers for Disease Control and Prevention:

{www.cdc.gov/lead}

Lacag la'aan ku wac Xarunta Xiriirka CDC: {800-CDC-INFO (800-232-4636); TTY 888-232-6348}

Consumer Product Safety Commission

{www.cpsc.gov}

Laynka macaamiisha ee bilaashka lagu waco: {1-800-638-2772; TTY 301-595-7054}

Barnaamijka Dalawandiga ee Environmental Protection Agency:

{www.epa.gov/lead}

{202-566-0500}

Xafiiska HUD ee Guryaha Caafimaadka Qaba iyo Xakamaynta Khatarta Dalawandiga:

{www.hud.gov/lead}

{202-402-7698}

Dadka maqalka ama hadalku dhibaayo ayaa ku heli kara lambarada wakaalada federaalka ee kore nidaamka TTY ayagoo wacaaya laynka bilaashka lagu waco ee adeegyada Relay Service ee federaalka {800-877-8339}.